Washington State Department of Social & Health Services

Transforming lives

Disembar 2023



# Taageerada Degdegga ah ee Hab-dhaqanka Guriga Gudahiisa ah ee Carruurta

## Guudmarka

Ka-tanaasulidda Taageerada Degdegga ah ee Hab-dhaqanka Guriga Gudahiisa ah ee Carruurta waa mid ka mid ah shanta ka-tanaasulid ee Adeegyada Guriga iyo Bulshada Ku-Saleysan ee federaalka ee Maamulka Naafonimooyinka Koritaanka ee DSHS.

Ka-tanaasulidda CIIBS waxay taageeraysaa carruurta halista sare ugu jira in meel guriga ka baxsan la geeyo iyadoo sababtu tahay hab-dhaqanno adag waxayna ka caawinaysaa in si guul leh guriga ugula noolaadaan qoysaskooda. Yoolasha waa in la sii wanaajiyo taageerada la siiyo qoysaska iyo xoojinta guusha carruurtooda ay ku guuleysanayaan guriga qoyska iyo bulshada.

Qorsheynta taageerada gaarka ah waa mid iskaashi leh oo kooxda ku saleysan. Kooxda qoys iyo cunug kasta waxaa ka mid ah xubnaha qoyska, saaxiibada, adeeg-bixiyayaasha, hawlwadeennada iskuulka iyo dadka kale ee muhiimka u ah nolosha qoyska iyo cunugga. Qorsheynta waxay dhisaysaa xoogagga waxayna ka shaqeynaysaa dhanka natiijooyinka uu qoysku wado.

## Miisaaniyad

Awoodda qaadka ka-tanaasulidda CIIBS waa ilaa 200 shakhsi. Sannad maaliyadeedkii FY23 ee gobolka, 167 shakhsi ayaa loogu adeegay ka-tanaasulidda CIIBS oo kharashkooda celcelis ahaan ahaa $2,065 bil kasta.

Ka-tanaasulidda waxay ku xaddidan tahay kharashka celceliska ah ee Xarumaha Daryeelka Dhexe ee loogu talagalay Shakhsiyaadka qaba Naafonimada Caqliga ee iskujir kastoo ah adeegyada lagama maarmaanka u ah baahiyda macmiilka la qiimeeyay. Dadka ka tanaasulka ku jira adeegyo uma diidi karto iyadoo sababtu tahay maaliyad la'aan, haddaba kharashaadka ka-tanaasulidda ayaa si taxaddar leh loola socdaa.

## Xaq-u-yeelashada

Macaamiisha DDA ee jira da'da 8 ama ka weyn kana yar da'da 18 oo loogu talagalay isqoritaanka hore kana yar da'da 21 oo loogu talagalay isqoritaanka joogtada ah oo:

- Ka soo baxa shuruudaha Naafonimada Damaannada Bulshada.
- Ka soo baxa shuruudaha Daryeelka Heerka Hay'adeed.
- Ka soo baxa jaangooyooyinka dakhliga iyo kheyraadka Apple Health ee Washington. (Iyadoo lagu saleynayo dakhliga iyo kheyraadyada macmiilka.)
- Ah muwaadin Mareykan ah ama deggane federaal ahaan sharci ah oo xaq u leh.
- Haysta Qorshaha Adeegga Qofka Xuddunta u ah iyo Qiimeynta ee DDA kaas oo sharxa sida baahiyada baxnaaninta, bedqabka iyo caafimaadka cunugga looga haqabtiri karo bulshada gudaheeda.
- Oggolaaday in uu aqbali doonno adeegyada guriga iyo bulshadaku saleysan iyo habka adeeg-bixinta CIIBS sida beddelka adeegyada aan xirfadda ahayn.
- Laga qiimeeyay halista sare ama daran ee geynta meel guriga-ka-baxsan iyadoo ay sabab u tahay hab-dhaqanka adag ka hor inta uusan barnaamijka isku-qorin.
- La nool qoyskooda.

Xiriirka: Ann Vasilev, *Madaxa, Xafiiska Horumarinta Barnaamijka iyo Siyaasadda* • Ann.Vasilev@dshs.wa.gov • 360-407-1567

Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah booqo: https://www.dshs.wa.gov/dda/

## La-socoshada Tayo Hubinta

### Dibedda

- Xarumaha Adeegyada Medicare iyo Medicaid.
- Mashruuca Tilmaamayaasha Muhiimka ah ee Qaranka.
- Xafiiska Hantidhowraha Gobolka Washington.
- Waaxda Caafimaadka Gobolka Washington.

### Gudaha

- Xafiiska DDA ee Barnaamijka iyo Horumarinta Siyaasadda.
- Xafiiska DDA ee Tayada, U-hoggaansamidda iyo Tababbarka.
- Xafiiska DDA ee U-hoggaansamidda Adeeg-bixiyaha iyo Tayo Hubinta Xilliga Kala-guurka.

## Qiimayaasha

Adeegyada ka-tanaasulidda ayaa waxaa bixiya adeeg bixiyeyaal kala duwan oo badan oo qandaraas la siiyay kuwaas oo qiimayaashooda ku xiran adeegga la bixiyay. Qiimayaasha adeegga waxaa laga heli karaa: https://www.dshs.wa.gov/altsa/management- services-division/office-rates-management

## Bah-wadaagta

- Shakhsiyaadka adeegyada helaya.
- Qosyaska barnaamij ka-qaybqaatayaasha.
- Maamulka Taageerada Muddada-Dheer iyo Waayeelida ee DSHS.
- Waaxda Carruurta, Dhallinyarada, iyo Qoysaska ee Gobolka Washington.
- The Arc of Washington State
- Xafiiska Difaaca Xuquuqda Naafonimooyinka Koritaanka.
- Xuquuqda Naafonimada ee Washington.
- Adeeg bixiyayaasha.
- Golaha Naafonimada koritaanka ee Gobolka Washington.

## Adeegyada Waxaa Ka Mid ah

- Tiknoolajiyadda Dadka Caawisa.
- La-qabsiga Deegaanka.
- Daaweynta Fardaha La Xiriirta (Equine Therapy).
- Daaweynta Muusikada.
- Ergay kalkaalanimo
- Ilaalinta Asaxaabta ama dadka isku faca ah
- Fududeynta Qorshaha uu Qofku Xuddunta U yahay.
- Ka nasasho.
- Qiimeynta Halista.
- Dharka gaarka ah
- Sahayda iyo Qalab Gaarka ah.
- Baxnaaninta Gaarka ah.
- Adeegyada Xasillinta-Baxnaaninta Gaarka ah.
- Adeegyada Xasillinta-La-talinta Qoyska iyo Shaqaalaha.
- Adeegyada Xasillinta-Sariirta Shido Weecinta.
- La-talinta Qoyska iyo Shaqaalaha.
- La-qabsashada Daaweynta ah.
- Gaadiid.
- Wax-ka-beddelka Gawaarida.

## Awoodda

- Maaliyadda federaalka ee waafaqsan qaybta 1915(c) ee Xeerka Damaannada Bulshada, Ka-tanaasulidda Adeegyada Guriga iyo Bulshada Ku-Saleysan iyo maaliyadda gobolka.
- Cutubka 71A RCW, Naafonimada Koritaanka.
- Cutubka 388-845 WAC, Ka-tanaasulidda Adeegyada Guriga iyo Bulshada Ku-Saleysan ee DDA.